



Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya

Barlamaanka Fedaralka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad

Documentigakalfadhiga 5-aad kulankiisa:9-aad

Kalfadhiga 5-aad

11/11/2014

Kulankiisa:9-aad, sacada furitanka.11:21gh, sacada xiritan.12:55gd.

Guntinta:

Shir-Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Federalka Soomaaliya

Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Federalka Soomaaliya

Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, goorti Guddoomiyaha Golaha uu furey shirkawaxaa mar qur'a sawaxan iyo buuq ka soo yeray holka shirka, xildhibaana daqaarkod waxey buuq la soo hor istaagan Guddoomiyaha Golaha hortisa.

Intaaka dib Guddoomiyaha Golaha awuxuu u soo jeediyay, xildhibaanada buuqa sameyay in ay iska soo xulaan 5 xubnod kadibna la wada hadlo Guddoonka iyo 5 xubnod, haseyashee xildhibaanadii buuqa sameyay way ku gacan seyran Guddoomiyaha Barlamaanka, mar labad wuxuu u soo jeediyay, xildhibaanadas in ay ilaaliyan sharciga iyo nidaamka, arintaasna wey kadiidan, mar sadexaad Guddoomiyaha Golaha wuxuu ka codsadey xildhibaanadas in ay xaalada dajiyaan sical loo garo taasna way ku gacan seyran Guddoomiyaha Golaha.

Guddoomiyaha wuxuu sheegey, in ay wanaagsantahay dimoqradiyada haseyeshe in leys ixtiramo oo leys qadariyo waayo, waxaa tihiiin golahii sharcidajinta dalka.

ShirGuddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Federalka Soomaaliya Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu shirguddoominayay kalfadhiga 5-aad kulankiisa:9-aad, uu sheegey in uu shirka xiranyahay sacada markey ahayd 12:55gd.